# Xaqa aad ku leedahay Deegaan

Warqadahaan waxaasoo saaray iskaashiga u dhaxeeya hay'adda isuduwidda qaxootiga Genevaiyo Rugta Sharci dejinta ee jaamacadda Geneva. Waxay ku wajahan yihiin caruurta aan qaan gaarin iyo kuwa qaan gaarka ah ee aan lala socon oo ku nool Geneva. Waxay uyeedadooda tahay in ay ku wargeliyaan sida ugu fudud xuquuqaha qaarkood ay ku leeyihiin bulshada dhexdeeda. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo faahfaahin , waxaad kala socon kartaa buug-yaraha ku yaal xuquuqda loo dajiyay dhallinyarada muhaajiriinta aan lala socon ee Rugta Sharciga.

**Mabaadi'da**

Haddii aad ku jirto nidaamka magangalyada, mabda'a ahaan waxaad ku jirtaa guri ama hooy wadajir loogu noolyahay. Deegaankaasna waa in la waafajiyaa baahidaada,halkaas waana in aad ka dareemi kartid ammaan .Xaaladaha qaarkood ,waxaad codsan kartaa in lagula dejiyo qoys ama guri gaar ah, laakiin aan wax dammaanad ah lahayn. Haddii aadan sharci lahayn iyo haddii aad tahay qof aan qaan-gaarin, mas'uuliyiinta waxaa ku waajib ah inay ku dejiyaan guri habeysan. Haddii aad qaan-gaar tahay, waxaad xaq u leedahay adeegyada la fidiyo tan oogu yar oo ey ku jirto meel aad jiifsato.dhinaca kale, si aad u hesho dheefahaas la fidiyo, waa inaad iska diiwaan gelisaa maamulka gobolka.yadoo ku xiran xaaladdaada, tani waxay horseedi kartaa in lagaa saaro dhulka Swisska. Haddii aad hesho ogolaanshaha B, ogolaanshaha F ama ogolaanshaha F-qaxootiga. Hoosbiiska (hospice génàral) wuxuu ku siinayaa guri kuuna sii wadaa ilaa iyo inta aad u baahan tahay laakiin wuxuu kugu dhiirigelin doonaa inaad adigu iskaaga u raadsato hoy. Qof ah LGBTIQ , waxaad xaq u leedahay ilaalin gaar ah.....Sidaas darteed waa muhiim inaad kala hadasho qof weyn oo aad ku kalsoon tahay. LGBTIQ:waa ereyo la soo gaabiyay oo loo isticmaalo in lagu qeexo , khaniis, lab/lab, dhedig/dhedig

**Dadka ka shaqeeya guryaha (hosbiiska)=(hey'ada caawinta bulshada)**

Guryaha waxaa maamula kooxo ka kooban:

- Shaqaale caawiye bulsho (Asistanse sooshaal) iyo kuwo loo yaqaan ururka bulsho faragelineed (ASIC) kuwaas oo horumariya waxqabadyada CHC-yada dhexdooda, iyadoo lala kaashanayo ururada iyo degmada. Waxaad la xiriiri kartaa( ASIC) wax kasta oo la xiriira wada noolaanshaha iyo arrimaha deriska.

- Wakiilo bulsheed iyo bulsho-yaqaan (1S) oo deegaanka ah, kuwaas oo inta badan daryeela dhinacyada farsamada iyo badbaadada goobta aad degentahay. Waxaad la xiriiri kartaa wakiillada bulshada iyo bulshada wax kasta oo la xiriira dhismayaasha (albaabka, daaqada, WC, jikada, alaabta guriga, iwm.)

- Waardiyayaal ama ilaalayaal rag iyo dumar ah, gaar ahaan habeenkii. .

Kalkaaliyayaasha Barnaamijka Caafimaadka Muhaajiriinta waxay xaqiijiyaan joogtaynta adeegga caafimaadka. Su'aalaha la xiriira caafimaadkaaga waxaad ka la xiriiri kartaa kalkaaliyayaasha caafimaadka dhammaantooda. Waxaad la xiriiri kartaa kalkaaliyayaasha caafimaadka dhammaan su'aalaha la xiriira caafimaadkaaga. Haddii ay lagama maarmaan noqoto (inaad la tashato dhakhaatiirtaada, way kuu sheegi doonaan sida loola xiriiro.

# Xaqa aad ku leedahay deegaan

**Nolosha gaarka ah ee guryaha wadajirka loo daganyahay**

Mabda 'ahaan, waxaan heli karaa armaajo aan qufulan karo si aan u ilaaliyo alaabtayda gaarka ah.Dadka i soo booqda waa la baari karaa. Ilaalada ammaanku waxay xaq u l eeyihiin inay baaraan qolkaaga iyo alaabtaada, xataa sabab l'aan. Dhanka kale, boobiisku xaq uma laha inay soo galaan qolkayga haddii aanad bixin ogolaasho .ama haddii booliisku aanu haysan ogolaanshaha maxkamadeed. Ilaalayaasha iyo dadka waaweyn ee kale ee ka shaqeeya guriga lagu siiyay ma siin karaan ogolaansho adiga l'aantaada.

**Qaabka Geneva hoy looga helo**

Aad bay u adagtahay in laga helo Geneva hoy aan qaali ahayn ,waqtiga sugitaankuna waa u dheeryahay.

Hosbiiska Guud waxa uu kuu soo bandhigi karaa hoy kuu gaar ah laakin ku xiran shuruudo, gaar ahaan haddii aad ka madax bannaan tahay Hosbiiska. Waxaa kale oo lagula dejin karaa shakhsiyaad ama dad raba inay soo dhaweeyaan qaxootiga. Hospiska Guud ayaa kula socodsiin kara ama suurtogalin kara arintaas oo kaa caawin doona habka loo maro. Gaar ahaan, waxaa jira "barnaamijka qoyska martida soo dhaweynta.

Waxaad sidoo kale ka raadin kartaa hoy dhinacaaga, adoo iska diiwaan gelinaya maamulka guryaha dadweynaha: https://www.fidp.ch/images/fichiers/inscription/Formulaire-demande-de-logement.pdf

Goobaha guriyeynta Waxaad ku feejig-naan kartaa websatyada guryaha soo bandhiga (tusaale, immobilier.ch). Xaaladdan oo kale, waa inaad horay u sii diyaarisaa faylkaaga. Adeegahaaga bulsho (assitant sociale) ayaa kaa caawin kara habkan.

**⚠ Digniin: ka digtoonow siityada ku siinaya caawimaad laakin lacag kaa raba, badanaa waa khiyaamo ama dabin loguu dhigay. Haddii aad iska diiwaan geliso adeegyada noocaan ah, xitaa adigoo calaamadeynaya sanduuq yar (waa marka aad foomka buuxineysid), waxaa laga yaabaa in lagugu qasbo inaad bixiso lacag badan. Kahor intaadan iska diwaangelin goobaha, ka hel sityada ama weebseytyada shaqaala haga bulshada, adeega sharci-yaqaan oo bilaash ah ama qof lagu kalsoon yahay.**

Haddii aad ku jirto tababar ama tababar shaqo ama aad shaqeyso, waxaad la tashan kartaa goobta (AGLAE ) kuwaasoo qora liiska hoy ardayda iyo shaqaalaha da'da yar.

# Xaqa aad ku leedahay deegaan

**Xiriirada**

**AGLAE - Ururka Geneva ee Tababarayaasha iyo Ardayda Housing:** https://aglae.ch/

**ADRET, guryaha intergenerational:** www.adretlancy.ch/fr/Logements-pour-etudiants.htm
Xoghaynta Sharciga Dadweynaha heyadda Aasaaska Guryaha / SFIDP:
Rue Gourgas 23bis, 1205 Geneva,
tel. : 022 418 34 05
www.fidp.ch

**Maamulka guryaha dawladda hoose / GIM:**
Rue de l'Hôtel-de-Ville 5, 1204 Geneva,
tel. : 022 418 34 05

**Magangalyada LGBT:**
rue de la Navigation 36, Pâquis,
tel. 076 663 78 29
https://asile-lgbt.ch/

**Asloca-Geneva (Ururka swiska oo dadka guri k**
Rue du Lac 12 (dabaqa 3aad), Eaux-Vives,
tel. : 022 716 18 00
https://www.asloca.ch/geneve/

